

# IS-DIIWAAN GELINTA DOORASHADA HEER DEEGAAN EE 2019

Doorashooyinka deegaanka waa markii aan go'aansano cida nagu matasho gollyaasheena iyo guddiyada caafimaadka. Qof walba ee ku jiro wareega doorashada way codeyn karaan doorashooyinka deegaanka. Doorashooyinka waxaa lagu qabanayaa doorashada deegaanka ee Oktoobar sannadkaan.

Doorashooyinku waxaa weeye kuwa goloyaasha magaalada iyo dagmada, goloyaasha gobalka iyo guddida caafimaadka ee degmada. Qaybo kamid ah New Zealand, doorashooyinku waxay sidookale ka dhici doonaan guddiyada jaaliyadda ee heer deegaan, hay'addaha iyo ururokale.

Waxaad u baahantahay inaad diiwaangashanaatid si aad u codeysid oo aad wax ka dhahdid doorashooyinka deegaanka.

Waad iska diiwaangelin kartaa codeynta haddii aad tahay 18 ama ka weyntahay, muwaadinta New Zealand ama daganaanshaha joogtada ah, oo aad ku nooleyd New Zealand in ka badan hal sanno oo si joogto ah qeyb ka mid ah noloshaada.

Si aad u hubisid in dad badan sida suurtogalka ah ka diiwaangashanyihin waqtigeeda si ay u codeeyaan, qof walba ee hadeer ku jiro wareega waxaa loo dirayaa baakida aqbaarta diiwaangelinta ee boostada ka bilow 29 Juun. Wuxaad u baahan tahay ookaliya inaad hubiso in xogtaadu sax tahay. Haddii ay sax tahay, uma baahnid inaad inaad wax kale samaysid. Haddii wax badalid loo baahdo, same waxa aad badalaysid dibna noogu soo dir sida ugu dhakhsaha badan.

Haddii aadan heli baakid xiliga Isniinta 8 Luuliyo, waxay u muuqataa inaadan ka diiwaangashaneyn inaad codeysid ama sharaxaadahaaga ma cusboona. Si aad isaga diiwaangelisid ama u cusbooneysid sharaxaadahaaga wuxaad u baahaneysaa inaad buuxisid foomka diiwaangelinta cusub. Booqo onleenka ee **vote.nz** ama soo wac **0800 36 76 56** si aad u weydiisid in foomka laguu soo diro.

Doorashooyinka waxaa maamulo goloyaasha deegaanka iyo dabayaqaqada Sebtembar waxay ku soo dirayaan waraaqaha codeynta boostada oo dhammaan codeeyayaasha ku jiro wareega doorashada.

**Haddii aadan diiwaan gashanayn jimcaha 16 agoosto ma heli doontid in waraaqaha codbixinta laguu soo diro.** Ihaddii aad is diwaan geliso taariikhdan ka bacdi, waa inaad khaas u codsataa waraaqaha cod bixinta kana codsataa sargaalka golaha doorashada deegaanka.

Wixii warbixin dheeraad ah ee diiwaangelinta lagu codeynayo booqo **vote.nz**

Wixii warbixin dheeraad ah ee codeynta doorashooyinka deegaanka booqo **vote2019.co.nz**

